Tallaalka Tdap

(Teetanaha, Gawracatada iyo Xiiqdheerta)

Waxaad u Baahan Tahay Inaad Ogaato

Many Vaccine Information Statements are available in Somali and other languages. See www.immunize.org/vis

Bayaanno Macluumaad Tallaal oo farabadan ayaa lagu heli karaa luqadaha Isbaanishka iyo luqado kaleba. Waxaad eegtaa www.immunize.org/vis

1 Waa maxay sababta la isu tallaalayo?

Teetanaha, gawracatada iyo **xiiqdheerta** ayaa noqon kara cudurro daran. Tallaalka Tdap ayaa inaga ilaalin kara cudurradan. Iyo, tallalka Tdap marka la siiyo haweenka uurka leh ayaa ka ilaalin karta ilmaha dhasha gawracatada.

TEETANAHA (Daan-qufulanka) ayaa maanta Maraykanka dhif ku ah. Wuxuu u horseedaa murqo giijisan iyo qalalitaan xanuun badan, badiyaana ah oogada oo idil.

- Waxay keeni kartaa giigsanka muruqyada madaxa iyo qoorta markaana ma furi kartid afkaaga, waxbana ma liqi kartid, ama mararka qaarkoodna maba neefsan kartid. Teetanaha ayaa dila qiyaastii 1 qof 10kii qof ee cudurku ku dhaco xitaa kaddib markay helaan daryeelka ugu wanaagsan ee caafimaadka.

GAWARACATADA ayaa m aanta Maraykanka gudahiisa dhif dhif ku ah. Waxay keeni kartaa dheeh qaro leh inuuuu abuurmo xagga dambe ee cunaha.

- Waxay u horseedi kartaa dhibaatooyin neefsasho, wadnaha oo shaqadiisa gaba, baaralaato, iyo dhimashaba.

XIIQDHEER AMA KIX ayaa sababta qufac daran oo muddo dheer socda oo keeni kara dhibaato neefsasho, matag, iyo hurddada oo qas gasha.

- Waxa kale oo ay keeni kartaa miisanka oo hoos u dhaca, isku-siideyn kaadi ama saxaro, feedhaha oo dilaaca. Illaa 2 ka mid ah 100-kii tobaneeyo-jir iyo 5 ka mid ah 100-kii qaangaar ee qaba xiiqdheerta ayaa la dhigaa isbitaalka ama yeesha xaalado ka-dar ah, oo ay ka mid yihiin oof-wareen ama dhimashaba.

Cudurradan waxa sababa bakteeriyo. Gawracatada iyo xiiqdheerta ayaa u kala faafa qof ka qof iyada oo ay u maraam qufacitaanka ama hindisoodka. Teetanadu waxay oogada ka gashaa meel jeexan, xagashooyin, ama dhaawacyo.

Kahor tallaallada, illaa 200,000 oo xaalado gawracato ah, 200,000 oo xaalado xiiqdheer ah iyo boqolaal xaaladood oo teetano ah ayaa la soo sheegi jiray Maraykanka gudahiisa sannadkiiba. Illaa markii tallaalladu ay bilaabmeen,ayay soo sheegitaanka dhicitaanka xaaladaha labada cudurba hoos u dhaceen illaa 99% oo xiiqdheertunta ay hoos u dhacday 80%.

2 Tallaal Tdap

Tallaalka Tdap ayaa ka celin kara tobaneeyo-jiryaasha iyo qaangaarka teetanaha, gawracatada iyo xiiqdheerta. Hal qiyaas oo Tdap ayaa sida caadiga ah loo siiyaa da'da 11 ama 12. Dadka aan ku *helin* Tdap da'daas waa inay sida ugu dhakhsaha badan ee suurtagalka ah ku helaan.

Tdap ayaa gaar ahaan muhiim u ah hawl-yaqaannada daryeelka-caafimaadka iyo qof kasta oo ku dhawaansho la leh ilmaha ka yar 12-ka bilood.

Haweenka uurka lehi waa inay helaan qiyaas Tdap muddo **kastaoo uur**, si looga ilaaliyo ilmaha dhasha ah xiiqdheerta. Dhallaanka sabiga ah ayaa halis u ah arrimo ka dar halis daran, oo nafta halis galisa oo ka timaad xiiqdheerta.

Tallaal kale, oo loo yaqaan Td, ayaa ka hortagta teetanaha iyo gawracatada, laakin kama hortago xiiqdheerta. Qiyaas xoojin Td ah ayaa lagu talinayaa 10-kii sanno ee kasta. Tdap ayaa lagu bixin karaa iyada oo ka mid ah kuwan xoojinta ah haddii aadan horayba waligaa u qaadan qiyaas. Tdap ayaa waliba la bixin karaa kadib markay qofka si xun meeli u jeexanto ama u gubato si looga hortago teetanaha.

Dhakhtrakaaga ama qofka ku siinaya tallaalka ayaa ku siin kara macluumaad dheeraad ah.

Tallaalka Tdap waxa si badbaado leh loo bixin karaa xilli la mida ah tallaallada kale.

3 Dadka qaarkood ma aha inay qaataan tallaalkan

- Qofka waligii ku yeeshay dareen-celin xasaasiyad oo nolosha halis galisay kaddib markii u qaatay qiyaas taallaal hore oo gawaracto, teetano ama xiiqdheer leh, AMA xasaasiyad daran ku yeeshay qayb kasta oo ka mid ah tallaalkan, waa inuuna qaadan tallaalka Tdap. U sheeg qofka bixinaya tallaalku wixii kasta ee xasaasiyad daran jiray.
- Qofkii kasta ee miyir beel noqda, ama suuxdinno badan oo soo noqnoqda gala gudahooda 7 maalmood kaddib qaadashada qiyaas carruurnimo ee DTP, ama DTaP, ama qiyaas hore oo Tdap, waa inayna qaadan Tdap, haddii la helo sabab kale oo aan ahayn tallaalka mooyee. Waxay wali qaadan karaan tallalka Td.
- Kala hadal dhakhtarkaaga haddii aad adigu:
  - aad leedahay suuxdin ama dhibaato kale oo ah xagga qaabka dareenka,
  - haddaad yeelatay xanuunsi daran ama barar kadib tallaalka leh gawracatada, teetanaha iyo xiiqdheerta,
  - waligaa ad yeelatay xanuunka loo yaqaan Guillain-Barré Syndrome (GBS),
  - aadan sii fiican dareensanayn maalinta ballanta tallaalka la qabtay.

DCH-1281SO
AUTH: P. H. S., Act 42, Sect. 2126.

Tdap VIS – Somali (2/24/2015)

U.S. Department of Health and Human Services
Centers for Disease Control and Prevention

4 Halista

Dawo kasta, oo ay tallaalladu ka mid yihiin, waxa dhici karta inay jiraan saamayno soo raaca. Kuwaas ayaa ah badiyaa kuwo sahlan ama iyaga ayaa iskood isaga taga. Dareen-celin daran ayaa waliba suurtagal ah laakiin waa dhif.

Dadka qaata tallaalka Tadp badankoodu wax dhib ah kalama kulmaan.

Dhibaatooyin sahlan oo ka dambeeya Tdap
(Aan qofka ka dhexgalin waxqabadyada)

- Barta tallaalka laga qaatay (illaa 3 markay yihiin 4 tobaneeyo-jire ama 2 markay yihiin 3 qaangaadhe)
- Casaan ama barar lagu yeesho barta tallaalka laga qaatay (qiyaastii 1 qof 5-tii qofba)
- Xummad sahlan oo ugu yaraan ah 100.4°F (illaa qiyaastii 1 marka la eego 25-kii tobaneeyo-jir ama 1 marka la eego 100-kii qaangaare)
- Madax-xanuun (qiyaastii 3 ama 4 qof markay yihiin 10-kii qof)
- Tabcaanimo (qiyaastii 1 qof markay yihiin 3 ama 4 qof)
- Lallabo, matag, shuban, calool-xanuun (illaa 1 qof 4-tii tobaneeyo-jir ama 1 markay yihiin 10 qaangaare)
- Qadhqadhyo, xubnaha oo damqada (qiyaastii 1 qof 10-kii qofba)
- Oogo xanuun (qiyaastii 1 qof marka loogo 3 ama 4 qof)
- Furuuruc, qanjidhyada oo barara (ma badna)

Dhibaatooyin sahlan waxa ka dambeeya Tdap
(Ka dhexgashay waxqabadyada, laakiin uma baahnayn wax ka qabasho caafimaad)

- Xanuun laga dareemo meesha irbadda laga qaatay (ilaa 1 qof 5 ama 6diiba)
- Guduudasho ama meesha tallaalka laga siiyay oo bararta (illaa qiyaastii 1 qof 16-kii tobaneeyo-jir ama 1 qof 12kii qaangaadhayaal)
- Qandho ka badan 102°F (illaa 1 qof 100-kii toboneeyo-jir iyo 1 ka mid ah 250-kii qaangaareyaal).
- Madax xunuun (qiyaastii 1 markayihii 7 toboneeyo jirayaal ama 1 ka mida 10-kii qaangaadhe)
- Lallabo, matag, shuban, calool-xanuun (illaa 1 ama 3 qof 100-kiiba)
- Barar ah cududda oo dhan meesha tallaalkaga lagu duray (illaa 1 qof 500ba).

Dhibaatooyin daran ka dib Tdap
(Aan karti u yeelan fulinta waxqabadyada caadiga ah; u baahan wax ka qabasho caafimaad)

- Bararitaan, xanuun daran, dhiigitaan iyo gacanta oo guduud ka noqota meesha tallaalka laga qaatay (naadir).

Dhibaatooyinka dhici kara kaddib tallaal kasta:

- Dadka ayaa mararka qaarkood miyir beela kaddib hawl caafimaad marka lagu sameeyo, oo tallaalkuna ka mid tahay. Fadhiga ama jiifsadka illaa 15 daqiiqo kaddib tallaalka ayaa ka caawin doona qofka kahortagga miyir-beelka iyo dhaawacyada ay keento dhicistu. U sheeg dhakhtarkaaga haddii aad dareento wareer, ama araggaagu isbeddelo ama dhagahaagi yeero.
- Dadka qaatrkood ayaa yeesha garab xanuun daran oo ay ku adkaataa inay gacanta dhaqaajiyaan gacanta halkii tallaalka laga siiyay. Taas ayaa dhacda marar dhif ah.
- Dawo kasta ayaa sababi karta dareen-celin xasaasiyadeed oo daran. Dareen-celin sidan oo kale ah ee ka timaad tallaalka ayaa aad dhif u ah, iyada oo lagu qiyaaso in ka yar 1 milyankii qiyaasoodba, oo waxay dhici doontaa dhowr daqiiqo illaa dhowr saacadood gudahood tallaalka kaddib.

Sida dawo kasta oo kale, ayay jirtaa calaf suurtagalkeedu aad u yar yahay oo tallaalku sababo dhaawac halis ah ama dhimashaba.

Waxa marwalba kormeer lagu hayaa badbaadada tallaallada. Macluumaad intaas dhaafsiisan intaas, booqo **www.cdc.gov/vaccinesafety/**

5 Maxaa dhacaya haddii ay dhibaatooyin darani ka yimaaddiin?

Maxay tahay inaan raadiyo?

- U fiirso wixii kasta ee adiga kaa wewelsiiya, sida calaamadaha dareen-celinta xasaasiyadda daran, qandhada aad u sarreysa, dabeecadda oo isbeddesha.
- Calaamadaha ficil-celinta xasaasiyadda daran waxaa ka mida xasaasiyad jidhka ah, waji iyo cune barar, neefta oo ku qabata, wadnaha oo degdeg kuu garaaca, dawakhaad, tabcaanimo. Taasi waxay bilaabantaa sida caadiga ah dhowr daqiiqo illaa dhowr saacadood kaddib tallaalka.

Maxay tahay inaan sameeyo?

- Haddii aad u maleyso inay tahay ficil-celinta xasaasiyadda daran am xaalad degdeg ah oo aan la sugin karin u wac 9-1-1 ama qofka gee isbitaalka kuugu dhow. Haddii kale, u wac dhakhtarkaaga.
- Markaa wixii ka dambeeya, ficil-celinta waa in waxbixin laga siiyaa Nidaamka Dhacdada Daran ee Tallaalka (VAERS). Dhakhtarkaaga ayaa xereyn kara warbixintan, ama adiga laftaada ayaa sidaas samayn kara adiga oo u mara websaydka VAERS ee ku yaal **www.vaers.hhs.gov**, ama adiga oo waca **1-800-822-7967**.

VAERS ma bixiso talo caafimaad.

6 Barnaamijka Qaranka Magdhawga Dhaawaca Tallaalka (National Vaccine Injury Compensation Program)

Barnaamijka Qaranka Magdhawga Dhaawaca Tallaalka (VICP) waa barnaamij federaal loo abuuray magdhowga dadka laga yaabo ay wax yeelleeyeen tallaallada qaarkood.

Dadka rumaysan inuu tallaal dhaawacay waxay wax ka ogaan karaan barnaamijka iyo sida loo xereysanayo cabasho iyagoo waca **1-800-338-2382** ama booqda websaydka VICP ee **www.hrsa.gov/vaccinecompensation**. Waxa jira wakhti ay ku xadaysan in la sheegto magdhow.

7 Sidee baan macluumaad intaas dhaafsiisan ku ogaan karaa?

- Weydii dhakhtarkaaga. Isga ama iyada ayaa ku siin kara waraaqda la soo galiyay baakada tallaalka ama kugula talin kara ilo kale oo aad macluumaad ka heli kartid.
- Wac waaxda caafimaadka xaafadda ama gobolkaaga.
- La xiriir Xarumaha Xakamaynta iyo Kahortagga Cudurrada (CDC):
  - U wac **1-800-232-4636** (**1-800-CDC-INFO**) ama
  - Booqo websaydka CDC ee ku taal **www.cdc.gov/vaccines**

Vaccine Information Statement

Tdap Vaccine

2/24/2015 **Somali**

Office Use Only

42 U.S.C. § 300aa-26

Translation provided by the Immunization Action Coalition

Somali

Si ay bixiyeyaasha daryeel caafimaad u helaan xaaladda saxda ah ee warka talaalka, qiimeynta warka, iyo jadwalka/kaltanka loogu taliyay talaalada mustaqbalka, waxa warka loo diri doonaa Michigan Care Improvement Registry (Diiwaanka Hagaajinta Daryeelka Michigan). Shakhsiyaadku ama dadku waxa ay xaq u leeyihiin in ay bixiyahooda daryeelka caafimaad ka codsadaan in aanuu Diiwaanka u gudbin warka.